

# Literature of Somali Onomastics and Proverbs

## By Anwar Maxamed



gorfayntii Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

hal\_aqoon@yahoo.com

Buugga la yidhaa 'Literature of Somali Onomastics and Proverbs' ayaa dhowaan ku soo biiray qoraal-hayeen kayga. Kol haddii aan dhawr buug oo hore wax ka idhi, waxa habboon bal inaan kanna wax ka tilmaamo ha yaraato ama ha buurraatee. Sidaasi awgeed waxan ku hakan magaca buuga iyo ka qoraaga. Tilmaan yarna waxan ka bixin hordhaca. Intaa kadibna waxan toos u aa'i qaybaha buugga aniga oo mid kasta tilmaami doona dhulka dareenka akhrista kicinaya.

Magaca buuggu waa af Ingiriis. Hayeeshee, kolkaad ka qoraha aragto ayey wax is diidayaan. Waa markii iigu horraysey een arko buug af Ingiriis ku qoran oo uu magaca qoruhuna far Soomaali ku qoran yahay. Hayeeshee, kolkaad hore u socota ayaad dareemaysaa inuu qoruhu si ula kac ah arrinta u yeelay.

Runtii, marka af Soomaali wax lagu qorayo in magacyada shisheeye loo yeelo ama lagu qoro far Soomaali si ay dhawaaq Soomaaliyeed u yeeshaan arrin xun maaha. Tusaale ahaan, kolka 'John' la qorayo in loo qoro 'Joon' waa aragti habboon. Hayeeshee, kolka aad af Ingiriisi wax ku qorayso inaad tidhaa ladhkii buuguna af Ingiriis ha ahaado kii qoraaguna Soomaali ha ahaado waa arrin ka hadalkeeda leh.

Haddii aan hordhaca ka bilaabo, waxa qumman kolka arrin faraha lala galo in wixii eed ah ul dheer layskaga durkiyo. Sidaasi awgeed, kolkii uu qoruhu ka hadlayey sooyaalka raggii u soo halgamay qoraalka farta Soomaaliyeed qaar buu magacaabay qaarna wuu ka tagtay. Dhabtii, ma sheegikaro inuu midhkaa badheedh iyo ula kas u yeelay iyo inay aqoon la'aan ka ahayd. Qoruhu innama soo hordhigin wax caddayn ah oo uu ku taageerayo sababta ku qasabtay inuu qaarna qoro, badhka kalana ka tago.

Qoriddii af Soomaaliga dad badan baa u soo halgamay. Dadaalkooduna ma kala yarayn. In la kala garbiyaana ma habboona. *Muuse X. Ismaaciil Galaal, Shire Jaamac Axmed, Maxamed Cabdi Makaahiil iyo Cabdil-laahi Xaaji Maxamuud* waxay ka mid yihiin raggii Soomaaliyeed ee u soo halgamay in af Soomaaliga la qoro. Mid kastaana wuxu soo bandhigay fartii uu islahaa waata ku habboon in afka lagu qoro. Waxa wax aad loola yaabo ah waxa loo xusiwaayo *Maxamed Xaaji Cismaan iyo D. I. Stepanjenko* oo ah raggii 1969kii qoray abwaanka yar ee la yidhaa 'Abwaan urursan: Af- Soomaali iyo Ruusha, Ruush iyo Soomaaliya' oo farta ku qorani

tahay ta hadda la adeegsado. Dhanka shisheeyaha waxa in la xuso mudan J. W. C. Kirk, R. C. Abraham, C.R.V. Bell, B. Panza, M. M. Moren, Armstrong iyo Dr. B. W. Andrjeweski.

Cutubka 1aad ladhkiisu waa ‘**Indigenous Names**’ oo ah magacyada asalka ah. Marka uu haddaba ladhku sidaa yahay maxaad filanaysaa? Anigu, qof ahaan, waxaan filayaa inaan la kulmo magacyo Soomaali-yeed oo sooc ah oo aanay ku jirin kuwa shisheeye laga soo ergistey siday doonaan-ba ha innoogu yimaaddeene. Kolkaad, haddaba, magacyada qaybtaas dhex mushaaxdo waxaad ku turrun-turroonaysaa qaar badan oo aan Soomaali ahayn. Tusaale ahaan, Abukar, Abokor, oo ka soo jeeda magaca Abu Bakar (أبو بكر), Askar, Askaro, oo ka soo jeeda ereyga Caskari (عسكري), Binti (hadduu magacu ‘Bint’ yahana waa ‘inan’, haddii uu ‘Binti’ yahayna waa ‘Inantaydii’), Cilmi, Daahir, (طاهر) Dahab (دهب), Dahabo, Isniino, Jimcaale, iwm. oo dhammaantodd ka soo jeeda Carabta.

Ujeeddadaydu maaha lalama baxo ee kol haddii uu ladhku ahaa magacyada asalka ah, hab qoraalka wanaagsani wuxu inna farayaa, in ladhka lagu ekaado. Magac-yadaasina waxay ahayd in lagu daro kuwa qaybta labaad ee ladhkeedu yahay magacyada ka soo jeeda Carabta. Halkaa waxa innooga dhuroobay inuu qoruhu ka baxay aragtiddii uu ladhka cutubku xambaarsanaa.

### **Magacyada aan ku hakaday:**

Intii aan akhriyey buugga, magacyo badan baa sida loo qeexay iga yaabisay. Deegaan-keenna oo ballaadhan dartii ujeeddooyinka ereyada iyo magacyaduba way kala geddisnaan karaan. Hayeeshee, wixii maangal ah marna layskuma diido. Arrintu sidaydoontaba ha ahaatee si loo arko ama laysugu foodiyo sida aan u qeexo magac-yada iyo habka qoruhu u qoray ayaan jecleystay inaan isugu kiin hoos qoro. Marka hore waxan sheegayaa sida uu qoruhu u qeexay, hoostana waxan ku qorayaa sida aan u qeexay\*:

**Cabban ama Cabbane:** Well armed, ready for combat. Ma ‘Cabbaysan’ iyo ‘Cab-baysane’ ayaad u jeeddey?

Sida aan u aqaan:

*Magacan anigu sidaasi uma aqaan. Cabba-naantu waa nuglaan, u adkaysi la’aan. Haddii aan idhaa, ‘Hebel waa qof cabban’ waxan ujeedaa waa qof aan adkaysi lahayn oo nugul. Markaa inantuna waa ‘Cabban’ oo ujeeddadu tahay inantii aan adkaysiga lahayn. Inankuna waa ‘Cabbane’ oo ay dulucdu tahay kii nuglaa ee aan adkaysiga lahayn.*

**Cadar:** Perfume, scent, aromati; shadow. (Kolka ereyga cadar uu la ujeeddo yahay ‘Perfume’ waa soogaleyti. Waana af Carabi ee Soomaali maaha. Hablahana ujeedda-daas looguma bixiyo).

Sidaan u qeexay:

*Maalintii kolka cirku daboolan yahay een qorraxi jirin, dhulkuna hoosiis yahay, gaar ahaan xilliyada xagaagii, ayaa la yidhaa Cadar. Haddaba inanta dhalata xilligaas oo kale ayaa loo bixiyaa magacan. Dulucduna waxay sheegeysaa iney inanta magacaa loo bixiyaa tahay tu dhalatay xilli dhulku hoosiis yahay. Waxa kale oo loo baxshaa magacaa inanta kolkay dhalato la dareemo in midabkeeda hoosiis ku jiro, oy noqondoonto inan madow. Ereygaa inay ujeeddadiisu sidaa aan soo sheegay tahayna waxa u marag furaya tuducan hoos ku qoran een ka soo qaatay*

*maansada la yidhaa Saadaal ee uu tiriyeey abwaankii weynaa ee Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin". Wa xaanu yidhi :*

CEERYAAMO SUBAXEED NIN MOOGI  
CADARKA ROOB MOODYE

**Dacar:** Bitter. (Ilmuhu wuu qadhaadhyahay layskama odhan karo. Waa in ujeeddo ka damaysaa. Qofka shisheeye ee arkaa wuu yaabayaa oo wuxu isweydiinayaa ilmuhu sidee buu qadhaadh u noqday ama u noqonkaraa).

*Sidaan u qeexayna waa:*

Dacartu waa geed-abaareed gaaban oo dhego waaweyn oo dheecaan qadhaadh leh. Dheecaankaas dawo ahaan baa loo cunaa. Intaan dawada cusubi soo gaadhin, dalkeenna geedkaas dheecaankiisa ayey Soomaalidii hore ka leefi jirtey qaniinyada kaneecada si aanu ugu dhicin cudurka duumadu. Kolka uu engego waxa lagu madoobeeyaa xadhkaha, badhooqda iyo maydhaxda kebdaha iyo hararka lagu samaysto. Geedkaasi waxa uu bixiyaa baal-dacar. Kaas oo isna xilliyada bar-waaqada uu ku samaysmo dhabaq. Dhabaquna sida la wada ogyahay waa macaan. Qaasinna waaba kii lahaa :

DACARTUBA MARBAY MALAB DHASHAA  
OOD MUUDSATAA DHABAQ

WAXAAN AHAY MACAAN IYO QADHAADH  
MEEL KUWADA YAALLE

*Badiyaana waxa la dhabaqsadaa aroortii inta ay qaboonada tahay. Haddaba geedkan waxa loogu naanaysdaraa ninkii labadaa arrimood ee geedkaasi leeyahay laga wada helo. Ujeeddadu waa tiyoo lagu tilmaa-mayo inuu ninka loo baxshaa yahay mid ba'an, marna uu yahay nin macaan oon waxtarkiisa iyo wanaaggiisa toona laga xiisagoyn. Naanaystani goonni way isu taagtaa, magaca qofkana way ku ladhantaa sida Cabdi-dacar.*

**Dheeg:** A highly elevated shop deck. (Ereygu ma 'Ship' baa? Haddii uu ereygu ku saabsan yahay markaba waa erey soogalaytiya. Waxaan filayaa inuu naanays ahaan ku baxo. Kolka uu soo-maaliga yahayse waa arrin kale).

*Sidaan u qeexay waa:*

*Magacan waxa loo baxshaa wiilka aabbihii aad ugu ekaada een aabbihii laga garan. Dulucduna waa tiyoo lagu shee-gayo inuu wiilku yahay ku aabbihii laga soo jeexay ama laga soo dheegay oo isaga oo kale ah. Dhanka afka waxan kaga maarmaynaa ereyga 'Copy' oo aad loo adeegsado.*

**Dhuule:** He who dresses in a leather garment. (Carruurta Jinka ayaa la yidhaa waxay dhashaan ayagoo dhar xidhan oo warmo sita. Insi isaga oo wax xidhan dhashaa ma jiro. Sidaasi awgeed, bal sidan u qeexay hoos ka eeg).

*Sidaan u qeexay waa:*

*Harag ama saan xoolaad oo inta si fiican loo megdiyey la liilshey oo waagii hore, intaanu dharku carro-edeg soo gaadhin, la xidhan jirey ama carruurta lagu xambaari jirey weeyaan dhuugu. Waxa kale oo loo yaqaan qayraan. Haddaba nudanaha "-le" halkan wuu taban-yahay ee ma toгна. kolka uu toganyahay ujeeddadiisu waa lahaade sida: Geelle; Xawaadle oo ujeeddadoodu tahay kii geela lahaa ama xawaadka. Kolka uu taban yahayse waa laawe sida: Faroole; indhoole; dhegoole; iwm. Markaa halkanna wuu taban yahay oo ujeeddada magacu waa dhuu laawe ama kii aan dhuuga lahayn. Haddaba wiilka dhasha kiiyoo reerkoodu caydh yahay oon bar xoolo ihi u dareerin ayaa magacaa loo bixiyaa.*

**Gaarriye** = a clever man, good man. (Uma haysto sidaasi)

*Sidaan u qeexay waa:*

*Naanaystan waxay isku ujeeddo yihiin naanaysaha kala ah "Dhiirriye" iyo "Gaam -biye". Waxaana loo bixiyaa ninkii socod-kiiisu ama tallaabadiisu aanay aad u dheerayn hayeeshee gaangaanbiya. Ujeed-daduna waa tiyoo lagu tilmaamayo inuu ninkaasi yahay mid dhiirriya ama gaambiya. Naanaystaasi magac kuma ladhanto ee goonni ayey isu taagtaa.*

**Gaariye** = Sida loo qoray baa qaldan baan u malayn ee hala hubiyo. Ma 'gaariyo' baa?

**Gaarriyo** = Magacani ma jiro. Haddii aan idhaa, 'Hebli wa gaari.' Waxan ujeedaa waa dhabeel. Gaarri ma filayo iney tahay. Gaariyo ma magac lala baxaa? Haddii lala baxo oo ereygu ka soo jeedo 'gaari' waa goonni.

**Gaas:** Paraffin. (Marka uu ujeeddadan lee-yahay waa soogalayti ee Soomaali maaha).

*Sidaan u aqaan:*

*Darajooyinkii ciidammada waxa ka mid ahaa 'Sarreeye gaas iyo sarreeye guuto'. Halkaa waxa kaaga cad inaanay ujeeddadu 'Paraffin' ahayn. Waa magac facweyn oo Soomaaliya oo lala bixijirey intaan gaastu innoo iman. Guutaale ayey isku ujeeddo yihiin.*

**Guulane:** Victorious. (Guuleedna maxaad odhan?)

*Sidaan u qeexay waa:*

*Xilliyada roobku yaraado ayaa xoolaha loo arooriyaa dhul fog oo ay habeenno ka dha-xaan. Xoolahaasi ayaa la yidhaa waa xoolo guul ah. Wiilka dhasha tii yoo xoolaha la guulinayo ayaa loo bixiyaa magacan. Ujeeddaduna waa kii dhashay iyada oo guul lagu jiro.*

**Gaaxnuug:** Sucker of milk tank. (Taangi wax laga jaqaa majiro ee naas baa wax laga jaqaa. Ereyga 'Tank' goortuu 'Naas' la ujeeddado noqday baana iga yaabisay!).

*Sidaan u qeexay waa:*

*Magacani wuxu ka kooban yahay labada qaar ee kala ah "Gaax " iyo "Nuug ". Gaaxdu waa caanaha xilligii la jiqijirey ama la lisijirey aan la jiqin ama aan la lisiin. Waxa haddaba magacan loo bixiyaa wiilka carruur ka horreysay dhimatay tiyoo aanay jiqin naaskii*

*hooyadood. Dulucdu waxay tahay iyada oo wiilka lagu sheegayo inuu yahay kii nuugay ama jaqay caanihii ku gaaxday naasihii hooyadii.*

**\*Ileeye:** One eyed, evil-eyed. (Ileyna maxaad ku sheegi?)

**\*Ma filayo inuu qofna ilmihisa curad ku sheegi inuu yahay mid cawrikulul ama wax ileeya. Ilmo dhashay sidee lagu garankaraa inuu il kululayahay iyo in kale?**

*Sidaan u qeexay:*

*Ubadku guud ahaan waa if-tiinka nolosha. Guri aan ubad jooginna waa guri aan ilays lahayn oo kale. Haddaba waxa aynnu magacan ka dhandhansan karraa in badiyaa loo baxsho wiilka curad ee qoys lagu gallado. Ujeedda-duna waa tiyoo wiilka lagu tilmaamayo inuu yahay kii qoyska u iftiinshey nolosha, mugdigii-na ay kaga baxeen. Ujeed dada labaad ee falka magaca oo ah (ilee) waa il biyo ah ka dhig. Waxaanay dulucdu tilmaamaysaa inuu wiilkaa aabbihii yahay mid doobnimo ku raagay, wiilkuna yahay kii ibo furay oo ay carruur badani daba socoto. Kolkanna waxa uu la ujeeddo yahay Ceeleeye.*

**Ilkudeeble: Ileeye.**

*Sidaan u qeexilaha:*

*Naanaystan ma ma qal. Hayeeshee, waxan u kala jebin 'il' iyo 'deeble'. Deebtu waa dab ama gubad. Nudanaha '-le'na wuu togan yahay. Sidaasi awgeed waa kii isha deebta ku lahaa. Si kale haddaan u idhaa waa kii isha dabku kaga yiil.*

**Jinaw:** Sour camel's milk; prospered.

*Sidaan u qeexayna waa:*

*Magacaasi laba ujeeddo ayuu leeyahay. Mar waa heerarka dhanaanka caanaha mid ka mid ah. Marka kalena waa geed ka mid ah geedquwaaxyada kana baxa guban-ka. Geedkaasi waxa uu bixiyaa midho madmadow oo dhanaan oo la cuno. Halka uu caanaha jinawga la yidhaa magacu uga yimidna waa halkaa. Hadda-ba, inanta kolkay dhalato loo arko inay noqonayso ama yeelan doonto midab madow ayaa magacaas loo bax-shaa. Dulucduna waa tiyoo tilmaamaysa in ay inantaasi tahay tu u madow sida midhaha geedka Jinawga la yidhaa.*

Magacan hablaha caddaan looguma bixiyo. Haddii dhanaan loogu bixiyase waa cay. Inan dhanaani maxay tahay?

**Meecaad:** Advantage; lasting value.

*Sidaan u qeexay waa:*

*Deegaanka Hargeysa wixii ka gal-beedeeya roob ka da'a weeyaan marka hore meecaadku. Kolka xigana waa ka soorayn ama lihiin dambe yeelad. Waana ka ujeeddada magacu ku dhisaalan tahay. Wiilka kolkuu yaryahay loo arko inuu fool-xun yahay lase filayo inuu isdhalan rogidoono kolka uu kobco ayaa loo baxshaa magacan. Dulucduna waa tiyoo lagu tilmaamayo inuu wiilku qurxoonaan doono kolka uu dhogor dhacsado. Ugu dambayntii xiddigiha cirirka ta ugu dambaysa ee u dhaxaysa rab dambe iyo gudin ayaa iyana la yidhaa Meecaad.*

**Meygaag:** Who he was born under the Meygaag tree. ( Waa suurtagal).

*Sidaan u qexay waa:*

*Meygaaggu waa geed aan qodax lahayn. Waana geed abaareed weyn oo madow. Kolka uu engegana waxa lagu culaa dhiilaha iyo gorofyada ama hadhuub-gaallada. Qofkii loogu magac daro waxa lagu tilmaamayaa inuu u madow yahay sida geedkaas.*

**Milgo:** Germination, sprouting, ... = magool? (Geed baa magoolay maqlay. Geed baase milgoobay maan maqal. Qoruhu ha sheego sida loo adeegsado).

*Sidaan u qeexay:*

*Inanta ka daba dhalata wiilal badan ayaa loo baxshaa magacan. Dulucduna waa tiiyoo lagu tilmaamayo inay tahay tu maamuus iyo magac leh kol haddii Eebbe la dhaliyey rag badan.*

**Qayaad** = Clever, brave.

Waxan magacan u aqaan inuu la mid yahay kale ee ah ‘Hayaan’.

**Quulle:** Wild nut; lit. born an environment full of wild wild nut-tree.

*Sidaan u qeexayna waa:*

*Midhaha geedka loo yaqaan jeerinka ayaa la yidhaa Quulle. Waanay madmadow yihiin. Dabaggaallaha ayaana cuna oo jecel. Ninka loo bixiyana waxa lagu tilmaamayaa inuu yahay mid u madow sida quullaha(midhaha Jeerinka ).*

**Sooraan:** Giver of food; host; distributor = Sade, Soore

*Sidaan u qeexayna:*

*Magacani laba ujeeddo ayuu leeyahay. Mar sooraantu waa oodda reerka lagu soo maageero, taas oo ka horjoogsata dugaag-ga. waxana magacaa bixisa hooya-da tiiyoo gabdho badan leh oo ka cabsiqabta in lala guursado ama la dhaxal wareejiyo uu Weynuhu wiil ku gallado. Waxaanu la ujeeddo yahay magaca Deyr. Dulucdu waa tiiyoo tilmaamaysa inuu wiilkaasi yahay kii belaayo xijaabka uga noqday wixii ay ka baqanaysay. Marka labaad isirka magacu waxa uu ka soo jeedaa ereyga Soor, kaas oo mar magac ah, marna fal. Marka uu magaca yahay ujeeddadiisu waa cunto. Kolka uu falka yahayna laba ujeeddo ayuu leeyahay. Ta hore waa sooryee. Ta labaadna waa qaybi. Soore waa qaybiye. Ujeeddadeennu ka ay ku dhisaalan tahayna waa kani. Haddaba hooyada dhasha ama leh laba gabdhood iyo wiil ayaa haddii Eebbe ku gallado wiil labaad u bixisa wiilka magacaa. Dulucdu waa tiiyoo lagu tilmaamayo inuu yahay kii carruurta u kala sooray laba wiil iyo laba ga-bdhood. Inanta waxa loo baxshaa Soora.*

**Shuun:** High caste.

*Sidaan u qeexayna waa:*

*Ujeeddada magacani waa Boqorad. Wa-xaana loo bixiyaa inanta loo arko inay ka wada qurux badan tahay hablaha kale ee geyiga kolkaa jira. Dulucdu waa tiiyoo lagu tilmaamayo inay inantaasi tahay boqoraddii quruxda. Inuu maga-caasi sidaa aan soo sheegay yahay kolka*

*haweenka loo baxsho, hayeeshee kolka ragga laga hadlayo uu boqoryahay ama madaxtinimo waxa kuu caddaynaya tuducan aan ka soo qaatay gabay uu tiriyeey Maxamed C. Xasan.*  
Waxaanu yidhi :

## SHUUNKII HARTOO WADA FADHIYA SHAAXIN GUDAHEEDA

**Xaddiyo:** Decoration; decorator

*Sidaan u qeeayna waa:*

*Xaddi waa wax farabadan oon la qiyaasi karin. Haddaba, dadkana waa lagu adeeg -sadaa ereygaa waxaana la yidhaa qofkaasi waa qof xaddi badan. Ujeed-daduna waa qof aad u balaadhan oo hilib badan. Haddaba inanta kolkay dhalato ballaadhan ama tirada badan ayaa loo bixiyaa magacaa. Dulucdu waa tiyoo la tilmaamayo inay inantaasi tahay tu hilib badan.*

Cutubka 2aad sida uu qoruhu tilmaamay waxa loo qoondeeyey in lagu tilmaamo magac-yada ka soo jeeda Carabta iyo Diinta Islaamka. Magacyo badan oo ku jira kuwa asalka ah ayaa halkanna ugu imanaysaa. Waxana hubaal ah in ay arrintaasi dad badan soof daran habaabinayso. Waxana la yaab leh sida magaca ‘Ubox’ uu ku noqday mid dhaqan shisheeye ka soo jeeda.

Magacyo badan oo qaybtan ku jira ayaan Soomaaliyi la bixin. Dad badan oo carab ah ayaa dalka deggenaa oo la bixijirey. Markaa ma dhegteenna baratay baa la mooday inaan la baxno?

Qaybta 3aad waxay ku saabsantahay maah-maahaha oo loo haltebiyey af Ingiriisi. Runtii aragtida ah in murtideenna af shisheeye loo hal-tebiyaa waa aragti dhawr-soon. Dad badan oo shisheeye aha ama dhallinta debedaha ku kacaamay ayaa wax badan ka dheefi.

Waxase xusid mudan sida laysugu murgiyo maahmaahaha, odhaahaha, halhaysyada iyo hal-ku-dhegyada. In halhays, odhaah ama hal-ku-dheg maahmaah laga dhigaana ma habboona. Haddii aan haddaba ku nasanno ta u horraysa ee odhanaysa:

*Xigmaddu waa murti ka maqan aqoonta.*

Jiritaanka hadalkan ayaa tallan igaga jiraa. Ereyga Xigmaddu waa af Carabi ujeed-dadiisuna waa murti. Haddii aan nidhaa, ‘Murtidu waa murti ka maqan aqoonta.’ ujeeddo buuran ma samaynayso.

Midda odhanaysa ‘Ummad aan dhigaal lahayni waa dhaayo aan araglahayn’ ayaa jiritaankeedu isweydiin leeyahay. Waayo sidaan kawada warqabno, farteenna dhawaan baa la qoray. Waxan caan ku ahayn oo laynugu yiqiin inaan bulsho hadal ahaanjirrey. Soomaaliduna waxay ka maahmaahijirtey wixii noloshoodu ku saabsan. Dhigaal ( qoraal ) meelna nolosha Soomaalida kagama jirin. Waxa haddaba isweydiin leh goortaan dhigaal ka hadalnay oo aan waxtarkiisa ogaannay?

Cabbaar kolkaad dhex mushaaxdo waxad la kulmaysaa qaabkii maahmaahaha loo odhanjirey oo mayal habawsan. Tusaale ahaan: Baahi badan, baryo badan, iyo bukaan badanba waa laysku

nacaa. Maah-maahdaasi waxay ku jirtaa kuwa loo yaqaan saddexleyda qaabkeeduna wuxu u dhigmaa sidan:

Saddex waa laysku nacaa:

Baahi badan,  
baryo badan, iyo  
bukaan badan.

Tan qudheedu taas kore ayey la qaab tahay.

Saddex baa rag ugu liita:

Ma toshe,  
Ma tashade, iyo  
Ma tashiishte.

Waxa la yidhi: Nin maalin ma gaadhid, ninna sannad ma gaadhid, ninna weligaaba ma gaadhid.  
Nin maalin ma gaadhido, ninka faras kaaga mid ka wanaagsan wata maalintaa ma gaadhid.  
Ninna sannad ma gaadhido, ninka xoolihiisa meel daaq iyo tigaad leh daajiyey sanadkaa ma gaadhid.  
Ninna weligaaba ma gaadhido, ninka kaa naag wanaagsan weligaaba ma gaadhid.

Ugu dambayntii, aqoonta magacyada oon badiyaa qoraaga Soomaaliyeed qalinba u qaadin ayuu qoruhu xilli badan u huray. Waxaanu soo bandhigay magacyo tiro badan oo dad badan ka kaalin doona dhanka magac bixinta. Qaar kalana ku dhiirrigelindoona inay si dhab ah u baadhaan sababta ay magcyadu ku baxaan.